Terapigrupp Smärta, april 2018

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

VGR14258

SOMALISKA

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

# Macluumaad loogu talogaley qofka u qaata daawo ay ku jirto maadada opioidka xanuun daran awadiis




## Information till dig som får behandling med opioid för akut smärta

## Macluumaad loogu talogaley qofka u qaata daawo ay ku jirto maadada opioidka xanuun daran awadiis

Qofka loo qoro dawada xanunnn baa'bisda ee :

___________________________________________

Maadooyinka firfircoon ee ay ka smaeysantahay dawada aad qaadato waxaa lagu magacaaba opioid. Dawooyinka lagu maghacaabo opioidka waa labo nooc mid-kood, waa morafi ah ama kuwa la mid ah morafinka, kuawaas oo leh waxtar iyo waxyeelo iyo waliba halis ah in lala qabsado oo la mid ah tan morafinka.Dhamaan dawooyinka lagu magacaabo opioidka ee loo isticmaalo daaaweynta xanuun baabi'inta waxaa lagu tilmaamaa in ay yihiin kuwo la mid ah maandooriyaasha. Haddii aad qaadato maadada lagu magacaabo kodein taas oo inta badan ku jirta daawada lagu magacaabo Citodon, waxa marka ay jidhka gasho isku bedeshaa morafin. Sidaa dartee ha iloobin in aad wargaliso dhakhtarkaag haddii aad qaadato/ isticmaasho dawooyin kale. Gaar ahaan aadbey muhiim u tahay haddii aad qaadato la isku dajiyo ama kiniinada hurdada (sida tusaale ahaan. bensodiazepiner). Waa in xitaa aad wargaliso haddii aad qaadato daawooyin aan loo baahneyn in uu dhakhtar soo qoro iyo dawo dhaqameedyada.

## Waxtarka iyo waxyeelooyinka

Daawooyinka lagu magacaabo opioiderka waxaa aad wax uga taraan xanuun baabi'inta, marka uu xanuun aad u ba'an oo degdeg ah ku hayo waxaa aad muhiim u ah in raacdo talooyinka lugu siiyo. Hadafka laga leeyahay cadadka dawada laguu qorey waa in uu aad wax uga taro xanuunka ku haya isla markaana ay waxyeela-diisu ay aad u hooseyso. Xanuun baabi'iye aan ku filneyn qofka waxaa uu kor u qaadaa halista ah in xanuunka qofka hayaa uu ku sii raago iyo in uu intaas ka sii bato isla markaana ay adkaato daaweyntiisu mustaqbalka. Dhinaca kale haddii qofka la siiyo cadad badan oo daawooyinka opioiderka waxaa kordhisaa halista in waxyeelo keento sida tusaale ahaan dheelalow, calool joogsi, yalaalugo/labo-labo, daal iyo  hurdo xumo. Waxaa intaas sii dheer in dawooyinka opioiderku ay keenaan isku dheelitirka iyo isku toosinta oo xumaad.

**Sidaa aawadeed muddada lagu gudo jiro daaweynta waxaa haboonin laga feejignaado in la wado/kaxeeyo baabuur iyo wixii la halmaala maadaama loo baahanyahay taxadar aad u badan. Iska ilaali in aad isla isticmaasho aalko-lon iyo daawooyinka la isku dajiyo ama kiniinada/dawooyinka hurdadaad (bensodiazepiner) maadaama ay taas macnaheedu tahay in keeni karto halis waxyeelo weyn ah.**

## Jooji daawaynta wakhti haboon

Ogow haddii aad daawada wado qiyaastii muddo ka badan labo todobaad in ay jir-to halis ah in aad dareento calaamado aan fiicneyn marka aad joojiso daawada sida tusaale ahaan hurdada oo kaa xumaata, hamaahsi badan, duuf badan, bu'da isha oo weynaata, jidhiidhico iyo yalaalugo/labo-labo. Kuwaas oo ah calaamadaha lagu garto xaraarada, laakiin in la dareemo xaraaro ma aha micnaheedo in uu jidhku la qabsadey daawada. Sidaa dartee kula heshii dhakhtarkaaga marka ugu horeysaba sida aad u joojineyso dawada. Marka muddo dheer la isticmaalo daawooyika opio-iderka wuu la qabsadaa jidhku daawadaas isla markaana wuxuu u baahdaa in badan marba marka ka danbeysa si uu helo waxtarkii uu awal ka hor heli jirey. Waxaa ay tani horseedi kartaa in jidhka iyo maskaxduba la qabsto daawada aad isticmaasho.

**Hadaba si yareeyo halisaha aan kor ku soo xusney waxaa aad iyo aad mu-hiim u ah in aad daawad u qaadato sidii uu dhakhtarku kuugu cayimey isla markaa ha u kordhisan si iskaa cadadka aad qaadato ama ha qaadan wakhri ka dheer wakhtigii aad kula heshiisey dhakhtarkaaga. Haddii uu xanuunku ku sii hayo ka dib wakhtigii laguu qorsheeyey inaad qaadato dawada fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga si aad u hesho talo bixin**

## Uurka/naas jaqsiinta

Haddii aad uur leedahay ama aad jaqsiiso naaska waxaa muhiim ah in aad ogeysiiso dhakhtarkaaga ka hor inta aanad bilaabin daawaada.